

Meelaynta ardayda - Soo jeedinta labo degganaashaha

Yoolalka:


- Sii ikhtiyaar guriga udhow ardayda dugsiga dhaxe iyo sareba oo kunool galbeedka Louisville ee cagagaarka dayax-gacmeedka. Qorshaha hadda waxuu bixiyaa ikhtiyaar guriga ka fog taas oo ardayda dhib ku ah sababo badan owgeed (tusaale ahaan saameyn ay kuyeelaneysa ardayda iyo kulug lahaanshaha qoyska).
- Sii xulushooyin dheeraad ah ardayda buuxiya baahida ardayda iyo tan qoysaskaba.
- Samee qorshe uwada siman degmada oo dhan taas oo siineysa ardayda oo dhan ikhtiyaar ay ugu xaadirikaraan dugsi u dhow guriga ama ay xulankaraan u safrikaraan meel kabacsan deriskooda.

Ficilo:

- Soo jeedinta codsashada ugu dambeyntii waxa uu ubaahandoona in lagu dhiso dugsi dhexe oo cusub galbeedka Louisville.
- Waxa loo baahan doona in la tixgeliyo dugsi dhexe oo labaad ee cusub iyo/ama ee galbeedka Louisville si loo dejiyo ardayda doonaya iney joogaan meel guriga u dhow.
- Dugsiyada ma yeelan doonaan dayax-gacameedyo haddii: (1) hadda ay leeyihiin xadduud la isku haleyn karo iyo/ama (2) kala duwanaashahooda uu la siman yahay ama uu ka sareeyo celceliska qeybta 1 ardaydu ee degmada.
- Yareey tirida dayax-gacameedka adigoo kadhigaaya 10. Tani waxay deriska siin doonta sii wadid iyo saadaalin.
- yareey qaababka quudinta ee dugsiga kuyaala cagagaarka dayax-gacameedka sidaa darteed ardayda iyo qoysaska waxay yeelan doonaan ikhtiyaar ay ugu xaadiraan usku dugsi dhexe iyo sare oo kuyaala deriskooda.
- Ardayda oo dhan waxay sii wadidoonaan iney isticmaalaan fursadaha fiican.

Faa'idooyinka macquul galka ah:

- Xulusho dheeraad ah oo loogu talagaley qoysaska.
- Fursado waaweyn oo loogu talagaley ka qaybgalka qoyska.
- hagaajinta xaadiritaanka.
- Hagaajinta howlaha dugsiga kadib.




Meelaynta ardayda - Soo jeedinta labo degganaashaha

Marka tani maxay ugu dhigantahay qoyska?

Hadda haddii qoys uu kunool yahay 1100 ee galbeedka waddada Dumesnil, ardaygu waxa lagu meeleynaya Highland dugsi dhexe ahaan iyo Fairdale dugsi sare ahaan.



Tani waxa loola jeeda:

1. Ardaygu waxa lagu meeleeya dugsi dhexe oo ka fog guriga.
2. Marka ardaygu uu ka yeesho saaxiibo ardayda isku fasalka yihiin iyo waxa tahay waqtiga dugsiga sare la aadaayo, ardayda kunool meel udhow Highland waa (qaybta ugu badan) oo lagu qorey Atherton balse ardaygani waxa maraa waddada oo dhan oo mareysa magaalada ilaa iyo Fairdale.



Sidee ayuu qorshaha cusub ubeddelanyahay?

1. Canuga ciwaankani waxa lagu qorey dugsiga dhaxe ee Noe ama dugsiga dhaxe cusub ee West End Middle. Qoyska waxa uu tixgelindoona labadan dugsi midka ugu habboon canugooda waxayna dooranayaan dugsigaas.
2. Canuga ciwaankani waxa lagu qorey dugsiga sare ee Seneca ama dugsiga sare cusub ee Shawnee. Qoyska waxa uu tixgelindoona labadan dugsi midka ugu habboon canugooda waxayna dooranayaan dugsigaas.



[Baar barnaamijyada dugsi raadinteenaa](#)

Qoyska waxa uu heleyaa inuu xusho meel guriga udhow ama ka fog ee labadaba dugsi dhaxe iyo dugsi sare laga bilaabo sannad dugsiyeedka 21-22 kuwa imaan rabo fasalka 6 aad iyo 9 aad. Markii hore, waxay kuqasbanaayeen in ay dadkooda katagaan. Ardayda hadda wax saameyna kuma yeelanin waxayna joogi karaan dugsi hadda ay joogaan.